

# MINNESOTA DFL



## DIFAACA CODBIXIYAHA


### Su'aalaha Badanka la Iska Waydiiyo Keenista Wakiilka

Su'aal	Jawaab
<b>Ayaa u qalma Keenista Wakiilka?</b>	<p>Si aad ugu qalanto keenista wakiilka, waxa waajib kugu ah inaad degan tahay:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Guryaha xannaanada</li> <li>- Xarun dadku kaalmo u baahan yihiin</li> <li>- Xarun guriga daawaynta</li> <li>- Guryaha dadka isku baahi qabaa degan yihiin</li> <li>- Gabbaadka haweenka ka baxsada xadgudubka guriga</li> </ul> <p>Ama:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Isbitaal aad taallo</li> <li>- Aadan awoodin inaad aaddo meesha laga codaynayo sababtuna tahay awood la'aan caafimaad ama xaalad caafimaad.</li> </ul>
<b>Sidee waraaqaha codaynta loo soo qaadanayaa loona celinayaa?</b>	<p>Waxa waajib ah inaad buuxiso codsiga foomka <a href="#">keenista wakiil ee waraaqda codaynta maqanaha</a>. U dhiib wakiilkaaga foomkaas iyo dalabka waraaqdaada codaynta maqanaha. Ha geeyo wakiilkaagu labadan foomba xafiiska doorashada deegaanka si loo helo waraaqdaada codaynta.</p> <p>Wakiilkaagu wuxuu kuu soo qaadi karaa waraaqdaada codaynta laga bilaabo toddoba maalmood kahor maalinta doorashada ilaa 2 galabnimo. Maalinta Doorashada. Doorashada Guud ee 2022, wakiilkaagu wuxuu soo qaadi karaa waraaqdaada codaynta laga bilaabo Noofambar 1eeda ilaa Noofambar 8eeda saacaddu markay tahay 2 galabnimp.</p> <p>Wakiilkaaga ama cid kale oo aad wakiilato ayey waajib tahay inay ku soo celiso waraaqdaada codaynta isla xafiiska doorashooyinka ugu dambayn 3 galabnimo. Maalinta Doorashada (Noofambar 8eeda, 2022). Sidoo kale waxaad ku soo celin kartaa boostada waraaqdaada codaynta. Saraakiisa doorashadu waxa waajib ah inay helaan waraaqdaada codaynta Maalinta Doorashada ama kahor.</p>
<b>Ayaa noqon kara wakiil?</b>	<p>Wakiilkaagu waxa waajib ah inuu noqdo:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Ugu yaraan 18 jir</li> <li>- Uu xiriir hore u jiray kula leeyahay</li> </ul> <p>Wakiilkaagu ma noqon karo:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Murashax</li> <li>- Ma noqon karo wakiilka in ka badan saddex codbixiye hal doorasho</li> </ul>

#### **Macluumaad Dheeraad Ah:**

<https://dfi.org/voterprotection/> | <https://dfi.org/> | | <https://mnvotes.gov>

**MN  
DFL**



**DIFAACA COBBIYAHHA**